Halkan waxaa ku cad bayaankayaga ee muslimiinta Soshiyaaldimoqoraadiga. Waxaa ka soo shaqeeyay go'aankiisana lahaa ururka Broderskapsrörelsen, xubnihiisa ka soo jeeda cariga Balkan, Afrika, Bariga dhexe, Aasiya iyo Iswiidhen, haween iyo rag intaba, u aaminsan diinta muuqaallo dhinacyo kala duwan, hase yeeshee ka mideeysan diinta islaamka iyo fikir ah in la helo bulsho ku dhisan mabda'a soshiyaaldimoqoraadiga. Ururkan Broderskapsrörelsen – xubnaha ururka soshiyaaldimoqoraadiga ee aaminsan diinta masiixiga waxaa lagu aasaasay magaalada Örebro sannadkii 1920-tameeyadii. Qaar badan ee aaminsanaa diinta masiixiga ayey kala soo gudboonaadeen shaki dhaqdhaqaaqa halgankii shaqaalaha, maadaama ey ahaayeen dadyoow diin aaminsan, sida kale waxaa fari kaga mudnaatay kaniisadahoodii maadaama ey ahaayeen xubno ka tirsan Soshiyaaldimoqoraadiga.

Waxaa ka soo baxday natiijo horusocod ah, ee laga bilaabo waagii la dhisay u halgamaya nabadda, gargaarka iyo cadaaladda. Annagu haddaannu nahay xubnaha muslimiinta ee ururka Soshiyaaldimoqoraadiga lafteenna waa midda aan u halgameeyno.

Laga bilaabo bartamihii sagaashameeyadii waxaa maalin walba maalinta ka dambeeysa kor u sii kacaya xubnaha muslimiinta ee gacanta ka geeysanaya ururka. Laga bilaabo sannadkii 2007 waxaannu leenhay shabakad guud.

Adiguna ku soo dhowoow xubinimmada!

Abdulkader Habib, Gudoomiyaha xubnaha shabakadda Soshiyaaldimoqoraadiga ee diinta aaminsan

Ururka Broderskapsrörelsen waxaa ku mideeysan dadyoow haysta diimaha masiixiga, islaamka, iyo diimo kale.
www.broderskap.se

Waxaan rabaa in aan xubin ka noqdo!

Magaca _____

Cinwaanka _____

Boostada _____

Lambarka aqoonsiga _____

E-post _____

Telefoon _____

Waxaan aqbalayaa in warbixinteeyda laga diiwaan geliyo diiwanka ururka Broderskapsrörelsens.

Broderskapsrörelsen
Svarspost
110405500
110 01 STOCKHOLM

Bayaanka muslimiinta Soshiyaaldimoqoraadiga

Bertil Kaa Hedberg

Broderskaps rörelsen
Shabakadda muslimiinta soshiyaaldimoqoraadiga

Bayaanka muslimiinta Soshiyaaldimoqoraadiga

In la ahaado muslin waa aqoonsi macnooyin kala duwan u leh shakhsiyaadka. Kooxda ugu horreeysay ee muslimiintu waa kuwo aaminsan taabacsan diinta islaamka, aaminsanna. Waxay wajibaadkooda diinta u gutaan heerar kala duwan. Intaa waxaa dheer koox iyagu aaminsan diinta islaamka una tahay diintu aqoonsi, hase yeeshee aan ku camal falin. Badnakood xubnaha waa dadyoow ka soo jeeda waddammo ey muslimiintu ku badan yihiin ama caqiidadoodu islaam tahay. Qaar badan ee ka mid ahina aaney isu heeysan iney yihiin kuwo caqiidada heeysta.

In la ahaado Soshiyaaldimoqoraadi waxay macnaheedu tahay in la qabo fikirka dhismaha guud ee bulshada, wuxuunna noo yahay mid aad ugu dhow cadaaladda diinta islaamka. Dalkii suurtagalka wuxuu ka dhigan yahay dareenka ah gacmo wadajir bay wax ku gooyaan. Dhismaha bulsho wanaagsanna waxaa tiir u ah in dhammaan bulshada oo dhami shaqayso mujtamacana wax ku soo kordhiso intii awooddaada ah, bulshadana sidoo kale laga taakuleeyo baahidooda. Waxaa laga hadlayaa sinnaan abuurta suurtagallo loo siman yahay ee dhanka xoriyadda, una suurtagelineeysa shakhsiga koboc, suurtagallo joogto ah ee horumar uuna kuna hiigsan karo gool-nololeedkiisa.

Ruuxa aaminsan mabaadiida Soshiyaaldimoqoraadku wuxuu qabaa in bulshada oo dhan laga qayb geliyo.

Firfircooni ka qeeybqaadashada dagaalka siyaasadda ee xoriyadda, sinnaanta iyo taakuleeynta waa xudunta Soshiyaaldimoqoraadiga. Annaga ahaanna waa mid aan ficil ahaan u fulineeyno mabaadiida quraanku xambaarsan yahay.

Sideedda qodob ee bayaankan ku cad ayaa ah mabaadiida lagu yaqaano ruuxa muslinka ee Soshiyaaldimoqoraadiga ah.

Waxaa soo diyaariyay ururka Broderskapsrörelsen shabakaddiisa muslimiinta bishii may 16keedii 2010

1. Waxaannu nahay muslimiin diintooda aaminsan, Soshiyaaldimoqoraadi ah ee u halgama nabad, taakuleeyn iyo cadaalad. Midda na mideeysa waa halganka horusocodka bulsho furfuran ee dimoqoraadiyad ku dhisan.
2. Waxaannu qabnaa in muslimiintu ka mid yihiin bulshada dalkan ku dhaqan, leh xuquuq iyo waajibaad la mid ah guud ahaan bulshada, in loo hogaansamo shuruucda dalka, la ixtiraamo lagulana noolaado bulshada inteeda kale.

3. Waxaan hiigsaneeynaa bulsho furfuran oo dimoqoraadiyad ku dhisan. Waxaannu hiigsaneeynaa xuquuqda in masjid laga dhisan karo meel walba ee baahi ka jirto, laga helo raashin xalaal ah iskuulaadka, goobaha shirarka iyo waxbarashada, la helo garasho lagu fasixi karo ruuxa kolka salaadda jimcada oo kale, ciidaha diiniyanka ah islamrkaana xuquuqda in habsami loola kulmo shakhsiga wata xijaab iyo kaan wdanba..

4. Waxaannu hiigsaneeynaa adduun cadaalad ku dhisan oo aanay ka jirin dabaqado, kala sarreeyn, cadaalad darro iyo isku dul noolaan ku saleeysan midabka, diinta ama jinsiyadda. Adduun cid walba loo baahan yahay, cid walba makaan ku leedahay, cid walbana isku qiimo iyo xuquuq tahay.

5. Waxaannu nahay dhaq-dhaqaaq ka soo horjeeda calaamadeeynta muslimiinta islamarkaana ku hoowlan sidii aan wax uga qaban laheeyn nooc walba in ruuxu si mutadawac ah isu takooro. Ma jiraan fikirro is diidaya in iswiidhish iyo muslin la ahaado.

6. Waxaan u taagannahay fikirka bulshada ee wadarta iyo dimoqoraadiyadda oo dhaliya fikir iyo xiise habab kala duwan ee loo noolaado, xitaa midda u muuqata wax aan la fahmi karin. Waxaannu diiddannahay kelitalinimada iyo meel uga dhaca bulshada ee keena in su'aal laga keeno iyo isafgaranwaa.

7. Waxaannu qabnaa in ruux walba xaq loo siiyo xoriyadda inuu u noolaado sidii uu doono, diinta uu doono iyo isticmaalkeeda, ixtiraamka habka shakhsigu u nool yahay, kuna saleeysan xeerarka dimoqoraadiga lagu gaaray ee dalka u dagsan. Habka keliya ee aan ku gaari karno dareen buuxa ee xorriyad bulshadeed waa ixtiraamka nolosha ruuxu doortay inuu u noolaado.

8. Waxaannu dooneeynaa cimilo bulsho furan ee aan loo arag waxa cusub halis ee loo fahmo hab-noleedyada kala duwan iyo caqiidada la aaminsan yahay suurtagallo.

Waxaa cayimiyay, go'aamiyay hoggaanka ururka Broderskapsrörelsen bishii may 28keedii 2010